

## KABKA SHILKA IYO JIRRADA TODDOBAADLAHA AH (LUMINTA WAQTIGA)

Kabka Shilka iyo Jirrada Toddobaadlaha Ah ayaa la bixin karaa haddii aad tahay Gebi ahaanba Naafu sababo Dhaawac ama Jirro aan shaqada la xiriirin. Waa in aadan awoodin in aad gudato waajibaadka shaqadaada waana in aadan ku mashquulin shaqo kale oo mushaari ah ama faa'iido ah. Intaa waxa dheer, waa in aad u shaqaynaysay Shaqo Bixiye Wax Ka Bixinaya caymiska wakhtiga aad naafada noqotay.

Qadarka Qiimaha Toddobaadlaha ah waa \$250.00 iyo Tirada Ugu Badan ee Toddobaadyada La Bixin Karo waa 13 todobaad. Kabka Shilka iyo Jirrada Toddobaadlaha Ah wuxuu bilaabanayaa maalinta ugu horreysa ee naafanimada uu keenay Dhaawac iyo maalinta siddeedaad ee naafanimada Jirro ay keentay. Jirrada waxaa ka mid ah jirrada jirka, oo ay ku jiraan uurka, iyo xanuunada maskaxda ama neerfaha.

## XILLIYADA NAAFOOYINKA ISKU XIG-XIGA

Labo ama in ka badan oo naafu ah ayaa loo tixgaliyaa hal xilli oo naafu ah ilaa aad ku soo laabato shaqo waqtibuuxa ah oo firfircoo ugu yaraan labo toddobaad inta u dhaxaysa xillyada naafada. Naafooinka xiga oo ay sabab u yihin sababo gebi ahaanba aan la xiriirin ayaa loo tixgaliyaa xilliyo gaar ah oo naafu ah ilaa iyo inta aad ku soo laabaneyso shaqo waqtibuuxa ah oo firfircoo ugu yaraan hal maalin inta u dhaxaysa xillyada naafada.

Inta lagu jiro usbuucyada qayb ahaan naafada la yahay, waxaa lagu siin doonaa qiime maalinle ah oo ah toddobo meelood-meel (1/7) ee Qiimaha Toddobaadlaha ah.

## KA REEBITAANADA IYO XADDIDAADAHA

Ma jiraan kabab lagu bixin karo Kabkan Shilka iyo Jirrada Toddobaadlaha Ah wax kasta oo ah:

- Naafonimo ka dhalata Jirro ama Dhaawac shil ah oo aadan ku hoos jirin daryeelka Dhaqtar sharci ahaan u qalma;
- Naafonimo uu daboolo Magdhawga Shaqaalaha ama sharci kasta oo jirada shaqada ah; ama
- Naafonimo uu sababay Dhaawac shaqo oo dhacay inti lagu shaqaynayey mushahar ama faa'iido.

FIIRO GAAR AH: Xeerka Dib-u-habaynta Canshuuraha ee 1986 wuxuu dhigayaa in dheef kasta oo aad ku hesho Kabka Shilka iyo Jirrada Toddobaadlaha Ah (sida hoos timaada qodobbada barnaamijka dheeftan) hadda aanay canshuur dhaaf ahayn waana in loogu daraa sidi qayb ka mid ah dakhligaaga guud ee sannadlahaa ah.

Foomka ku lifaaqan iyo dukumiinti kasta oo loo baahan yahay waa in aanu saxiixin dhakhtarkaaga loona xareeyo Xafiiska Sanduuqa galliinka ka hor. Marka sidaas la sameeyo waxay keeni doontaa in waraaqaha loo arko in aanay ansax ahayn sheegashadana waa lakin ansali. Wuxaad u baahan doontaa in aad howsha dib u soo bilowdo.